

Muxuu yahay xarunta soo dhaweynta dadka dalka ku cusub?

- Xarumaha soodhaweynta dadka dalka ku cusub waxay bixiyaan soo dhaweynta ugu horreysa iyo qiimeynta Luqadda Ingiriiska iyo khibradaha xisaabta ee ardeyda dalka ku cusub ee da'da dugsiga sare ah. Qiimeyntanu waxay Dugsiyada sare ee deegaanka ku kaalmeynaysaa in ardeyda cusub ay ku meeleeaan barnaamijyada aqoonsiga (credit) leh ee dugsiga sare
- Xarun kasta oo soodhaweynta waxay leeyihiin shaqaale luqado kala duwan ku hadla oo awoodi kara inay kaalmeyaan ardeyda dalka ku cusub iyo qoysaskooda si ay u bartaan waxa ku saabsan nidaamka dugsiga ee Onteeriyo
- Qoysaska dalka ku cusub waxay fursad uyeelanayaan inay la kulmaan shaqaalaha Dejinta oo xogwarran ka siinaya mawduucyada ay ka mid yihii helitaanka guryaha, shaqo raadinta, fududeynta Daryeelka Caafimaadka iyo la xiriirinta heyado kala duwan oo gargaarka ah.

Yaa u baahan in la qiimeeyo?

- Dhammaan ardeyda da'da dugsiga sare waa inay illaa-wa-illaa Luqaddooda Ingiriiska iyo khibraddooda xisaabta lagu qiimeeyaa saddexda xarumood ee GDDT ee Soodhaweynta Dadka Dalka ku Cusub, kahor intayna iska diiwaan galinin dugsiga sare ee deegaankooda.



Maxaa ka dhacaya intaad Xarunta joogtaan?

- Ardeydu maalintaas oo dhan ayay xarunta sii joogayaan iyagoo qiimeyn waxqabadyo kala duwan la sameynaya macallimiinta Xarunta Soodhaweynta Dadka Dalka Ku Cusub. Waalidiinta iyo Daryeelayaasha waxaa lagu dhiirigalinayaa inay ardeyda ballanta u soo raacaan Kadibna dhammaadka maallinnimada ay iska noqdaan si ay macallimiintooda uga wada xaajoodaan qiimeynta ardeyda. Waxaa jira fasax wakhtiga qadada ah markaasna waxa si adag laidin kula talinaynaa in ardeydu qadadooda horey usoo qaataan.



Xogwarran dheeraad ah oo kaalmada ESL/ELD, fadlan waxaad booqataan Website-ga GDDT

www.tdsb.on.ca

Somali

Xarumaha Soodhaweynta Dadka Dalka ku Cusub ee GDDT



Ardeyda Dalka ku Cusub iyo Qoysaskooda waxaan ku Soodhaweynaynaa Dugsiyada Sare ee GDDT



www.tdsb.on.ca

Sideebaad ballan u sameysan?

- Students and their families must book an appointment by telephone at any of the Newcomer Reception Centre locations. Due to the large number of newcomer students requiring assessments, it is not possible to accommodate walk-in requests for immediate assessment.
- The busiest times of the year are August, September and January. During peak times there may be a waiting time of several days to receive an appointment.

Waxa illa-wa-illaa lagaa rabo inaad la timaadid?

- Dokumento Sharciyeysan oo munaasab ah
- Laba xabo oo caddeyn ah oo cinwaankiina hadda ah (Heshiiska ijaarka, biilka Telefoonka, qoraal bankig ah, leesanka dirawalnimada ama documento dawladda oo cinwaankiina hadda ku yaalo.
- Dukumentooyinka dugsigii hore ee ardeyga/da haddii la heli karayo.
- Caddeyn tallaalaka ah, haddii la heli karayo
- Qado



Xageebay ku yaalaan Xarumaha Soodhaweynta ee Dadka Dalka ku Cusub ee GDDT



Xarunta Soodhaweynta Georges Vanier (Georges Vanier Reception Centre)

Telephone: 416-395-9440
3000 Don Mills Road East, M2J 3B6
(Qolka 201 aad ee gudaha dugsiya sare ee Georges Vanier)
Labo nalalka trafikada ee Koonfurta Finch ama 3 meelood oo basasku istaagaan oo Waqooyi ka xiga Saldhigga Subway-ga Don Mills. Goobtani waxay wax u qabtaan ardeyda Dugsiyada sare wax ka dhigata waqooyi-bari ee Toronto.



Xarunta Soodhaweynta Greenwood (Greenwood Reception Centre)

Telephone: 416-393-0750
24 Mountjoy Ave., M4J 1J6
(Qolka 105aad ee gudaha Dugsiya Sare ee Greenwood)
Hal sakkad (Block) Koonfurta Danforth Ave. iyo hal sakkada ee Bariga Greenwood Ave. una dhaw saldhigga subway-ga Greenwood. Goobtani waxay wax u qabtaan ardeyda Dugsiyada sare wax ka dhigata dhinaca Koonfur bare ee Toronto



Xarunta Soodhaweynta dhinaca Galbeedka (West End Reception Centre)

Telephone: 416-393-0542
777 Bloor Street West, M6G 1L6
(dhabaqa 4aad ee Xarunta Dhismaha Bickford (Bickford Centre building) oo ka xiga dhinaca Koonfureed ee Bloor una dhaw saldhigga subway-ga Christie. Goobtani waxay wax u qabataa ardeyda Dugsiyada Sare wax ka dhigata dhinaca Koonfur-galbeed ee Toronto

